

## **Sahra iyo Maryan**

Sahra iyo Maryan waa laba gabdhood oo saaxiib ah. Labaduba waxa ay dhigtaan dugsi xaafaddooda ku yaal.

Mar kasta waxa ay isu raaci jireen dugsiga. Sahri keligeed ayaa ay shalay dugsiga timid. Maryanna waa ay maqnayd.

Sahri intii ay dugsiga joogtey oo dhan waxa ay ka werwersanayd waxa ku dhacay saaxiibaddeed. Markii ay xiisaskii dugsigu dhammaadeen, Sahri toos bay u tagtay gurigii Maryan. Waxa ay ogaatey in ay Maryan bukto oo uu ku dhacay hargab xumi. Sahri markii ay salaantay Maryan ka dib, ayaa waxa ay uga warrantay dugsiga iyo casharradii maalintaa la soo dhigay, dabadeed waxa ay Al le uga bariday in uu siiyo caafimaad degdeg ah. Maryan aabbaheed iyo hooyadeed aad bay Sahra ugu mahad naqeen.

## **Kaga jawaab weydiimahan buuggaaga layliga**

1. Magaceed Sahra saaxiibaddeed?
2. Maxaa ay Maryan dugsiga u tegi weydey?
3. Sahri xaggee bay qabatay markii waqtiga dugsigu dhammaaday?
4. Maxaa ay u sheegtay Maryan?
5. Yaa ay Sahri uga bariday caafimaad Maryan?
6. Maryan aabbaheed iyo hooyadeed maxaa ay ku yidhaandeen Sahra

## **Ushaqeeyakooxo**

Sameeya riwaayad ku saabsan saaxiibtinimo. Sahra iyo Maryan waa magacyo gaar ah ama la yaqaan. Magacyada gaarka ahi waxa ay ku bilaabmaan xarfo waaweyn.


Magaca gaarka ihi waa magac: qof, maalin, bil, magaalo, dal, buur. Bad.

**U shaqeeya laba-laba. Jawaabaha oo dhammi waa magacyo gaar ah ama la yaqaan.**

1. Qor saddex magac oo gabdhood.
2. Qor saddex magac oo wiil.
3. Qor magacyada afar magaalo.
4. Qor magacyada laba tog.
5. Qor magacyada saddex maalmood oo toddobaadka ka mid ah.

**Guuri weedhahan. Hoos ka xarriiq magacyada gaarka ah ee ku jira weedhahan**

1. Sahra iyo Maryan waa saaxiibado isku fiican.
2. Waxa ay ku nool yihiin Laascaanood.
3. Cali iyo Axmed waxa ay ku nool yihiin Hargeysa
4. Hargeysa waa magalo madaxada Jamhuuriyadda Somaliland.
5. Cali waa baraha Muuse.
6. Waxa uuku noolyahey magaalada Sallaxley



Illustrasjon: Studiostoks/ AdobeStock

## **Magac guud iyo magac gaar ah.**

Waxa aynnu u qaybin karnaa magacyada laba qaybood. Magac guud waa magac ka dhexeeya dad ama xoolo ama walaxo.

Sida: lo', dad, arday, dal, guri. Magaca guud kuma bilaabmo xaraf weyn.

## **Guuri weedhaha, hoosna ka xarriiq magacyada guud.**

1. Waxa aan lumiyey qalin.
2. Waxa aan raadinayaa hilib.

3. Bugsigoodu waa yar yahay.

4. Aabbihii waa beeraley.

5. Wiilku waxa uu doonayaa caano.

Magaca gear, waxa uu gear u yahay dadka, magaaloooyinka, waddamada, maalmaha, bilaha, webiyada, buuraha, togagga iwn.

Magaca gaarka ahi waxa uu had iyo jeer ka bilaabmaa xaraf weyn. Sida Cali Buuhoodlle, Ceel-Afweyn.

## **Guuri weedhahan oo hoos ka xarriiq magacyadagaarka ah**

1. Xaawi waa walaashaa.

2. Caasimadda Somaliland waa Hargeysa

3. Ma waxa cad ku dhalatay Seylac?

4. Waxa aan Jimcaha tagaa masaajidka.

5. Buurta waddankeenna ugu dheeri waa buurta Surad.

6. Geed deeb lihi waa meel qurux badan.

7. Qoryaale, burugsi, Garadag, laasqoray iyo Taleex waa degmooyin.

8. Noobiyadda iyo bubaar waa meelo taariikh leh.